

# IDRS Infectious Disease Reporting System

Disease Reporting 24 Hours a Day

Columbus Public Health and Franklin County Public Health

## CAMPYLOBACTERIOSIS

*Campylobacter* waa bakteeriyaha inta badan sababa cudurka shubanka ee waddanka Mareykanka.

### Calaamadaha

Badanaa calaamadaha waxay ku bilowdaan 3 - 5 maalin gudahooda. Inta badan dadka, cudurka wuxuu soconayaa ilaa hal todobaad.

- Badanaa calaamadaha hore waxaa ka mid ah qandho, madax xanuun, muruq xanuun iyo daal
- Shuban dhexdhexaad ah ilaa mid darran (waxaa dhici karto in uu la socdo dhiig)
- Majuujiinta caloosha
- Qandho (waxay ahaan kartaa qandho badan)
- Mattag
- Dadka qaar waxay la kulmi karaan xanuun yaryar ama waxaa dhici karto in aysan isku arkin calaamado.

### Gudbinta

- Bakteeriyaha waxaa inta badan faafiya raashinka ama biyaha wasakhaysan. Hilibka sida xun loo kariyay (khaas ahaan digaagga) waa ilo caadi ahaan laga qaado.
- Khudaarta iyo raashinka aan la karinin waxay noqon karaan kuwa ay soo gaarto wasakhda marka la taabto hilibka ceyriinka, juus ama miisaska lagu jarjaro hilibka ceyriinka.
- Dadka waxay kaloo cudurka ka qaadi karaan xoolaha uu soo gaaray cudurka (khaas ahaan eeyaha iyo mukulaasha yaryar ee qaba shubanka).
- Kuwa aan badanaa la arkin sida bakteeriyaha wuxuu ku faafi karaa qof ilaa qof marka la taabto gacmaha, raashinka, ama shay, soo gaaray wasakhda saxarada (xaarka).

### Daweynta

- Campylobacteriosis waxaa la ogaan karaa marka shaybaar lagu baaro cad laga soo qaaday saxarada (xaarka).
- Inta badan dadka waa ka bogsadaan, daawo la'aan.
- Bukaanka waa in ay cabbaan dareere badan ilaa inta shubanka uu socdo.
- Haddii cudurka darran yahay ama dheeraado, bixiyaha daryeelka caafimaadka wuxuu qori karaa antibiyootiko.
- Ma badna kiisaska uu campylobacteriosis sabab u noqon karo laffo xanuun soo noqnoqda ama calaamadda lagu magacaabo "Guillain-Barré syndrome" taasoo ah cudur saameyaa nerfaha jirka.

### Ka Hortagga

- Si wanaagsan u dhaq gacmaha adiga oo adeegsada saabuun iyo biyo qandac ah kaddib marka aad isticmaashid musqusha ama aad baddashid xafaayadda.
- Si wanaagsan u dhaq gacmaha ka hor iyo kaddib marka aad diyaarisid raashin, khaas ahaan marka aad ka shaqeysid hilibka ceyriinka ama digaagga.
- Ha cabbin caano aan laga dillin bakteeriyaha ama ha cunin formaajo laga sameyay caano aan laga dillin bakteeriyaha.
- Si wanaagsan u kari dhamaan hilibka, khaas ahaan digaagga. Haddii lagu siiyo hilib aan la karinin, dib u celi ilaa si wanaagsan looga kariyo.
- Si wanaagsan isaga dhaq gacmaha kaddib marka aad ka shaqeysid xoolaha ama xoolaha guri joogga iyo wasakhdooda.
- Dadka qaba campylobacteriosis ee taga xarunta xanaanada carrurta ama ka shaqeeya adeegga raashinka, daryeelka bukaanka, ama xanaanada cunugga waa in ay joogaan guriga ilaa shubanka ka dhamaado. Sharciga Ohio wuxuu leeyahay shaqaalaha adeegga raashinka ee qaba campylobacteriosis waa in ay qaataan antibiyootiko muddo labo maalin ama in laga qaado labo cad saxaro oo negatiivo ah ka hor inta aysan ku soo noqonin shaqada.

Dhamaan macluumaadka waa guud mana loogu talogalin in loo isticmaalo in lagu baddalo waanada qofka aqoonta leh.



c/o Franklin County Public Health, 280 East Broad Street, Columbus, Ohio 43215-4562

Call: (614) 525-8888 • After Hours: (614) 525-3965 • Fax: (614) 525-8890

Email: [idsr@franklincountyohio.gov](mailto:idsr@franklincountyohio.gov) • Web: [www.idrsinfo.org](http://www.idrsinfo.org)

